UW Medicine

Siyaasada Dalicida Kharashka iyo Uruurinta
UW Medical Center iyo Harborview Medical Center
- Dhakhaatiirta UW
- Dhakhtarka Daryeelka Koowaad ee UW Medicine

Koontooyinka Bukaanka iyo Adeegyada Taageerada
Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka

BAAXADA IYO UJEEDADA

Sababo la xariira siyaasadaan, xajmiga Daawada UW Medicine waxaa kamid ah:
- UW Medical Center iyo Harborview Medical Center, Dhakhaatiirta UW iyo Dhakhtarka Daryeelka Koowaad ee UW Medicine.
- Xarumaha caafimaadka waxay sameeyaan xarunta caymiska, kharashka bukaanka iyo lacag aruurinada.
- Xarumaha Caafimaadka waxay wakiil ka yihiin Dhakhaatiirta UW iyo Dhakhtarka Daryeelka Koowaad ee UW Medicine si loo dalaco kharashka bukaanka loona aruuriyo lacagta.
- Adeegyada Qorsheynta Ku dhaqanka Kuliyada waxay fuliyaan dalacaaya kharashka caymiska ee casriga ah iyagoo ka wakiil ah Dhakhaatiirta UW.
- UW Medicine Primary Care waxay fulisaa dhibcaha adeeg uruurinta ee kharashyada xirfadlayaasha ee lagu bixiyo rugtooda caafimaadka.

Hadafkeena isku dhafka ah wuxuu u baahan yahay siyaasada lacag aruurinta:
- kor u qaadaysa in lacagta adeegyada la bixiyay la helo waqtiga saxda ah;
- ku haboon xaaladaha dhaqaale ee shaqsi kasta oo bukaan ah;
- bixisa dookhyo badan oo dabacsan oo ay helaan bukaanada si ay u buuxiyaan waajibaadkooda dhaqaale;
- isku dhafeusa kharashka xirfada iyo kan xarunta si ay u noqdaan hal bayaan oo ah adeegyada la helay markay ahayd taariikhdu ama kadib 3/27/2021;
- kobcinta tayada adeegga macmiilka si loo xalliyo su'aalaha dalacaaga kharashka kadib marka la sameeyo hal wicitaan oo hal lagu gaaro; iyo
- sheegeysa in kaalmada maaliyadeed ay tahay ikhtiyaar ka hor inta aan wax laga waydiin bukaanka caymiska, lacag bixinta/uruurinta, ama waqti kasta oo uu bukaanku dalbado gargaar ama uu muujiyo walaac marka uu bixinayo kharashkiisa.

SIYAASADA

FILASHOOYINKA DHAQAALE

Iyadoo loo hogaansamaayo siyaasadaan iyo Siyaasada Caawimaada Dhaqaake, UW Medicine waxay si cad ogala xiriiri doontaa bukaanada filashooyinka maaliyadeed marka koowaad ee ay qabsadaan ballan laguna jiro hawsha dalicida kharashka sida macquulka ah.
- Bukaanada ayagaa masuul ka ah fahmida waxyaabaha caymiskooda daboolo iyo bixinta dukumiintiyada loo baahan yahay si kor loogu qaado nidaamka lacag kasoo uruurinta caymiska.
- Bukaanka waxaa looga baahan karaa inay bixiyaan lacag debaaji ah oo adeegga la siinaayo looga qaadaayo ama qoondada caymiska ee la qisaaday iyo lacaga laga jaro ka hor adeegyada intaan la siin (marka laga reebo Waaxda Gurmadka xaaladaha degdega ah, xaaladaha kale ee degdega ah, ama dhinacyada masuulka ka ah ee buuxiya shuruudaha dadka saboolka ah ee hoos yimaada Xeerka Maamulka Washington (Washington Administrative Code, WAC) 246-453-040) ama cadadka lacagta ayaa laga qaadi karaa ka dib marka adeegyada la bixiyo.
- Guud ahaan bukaanada ayagaa masuul ka ah inay si iskooda ah iskaga bixiyaan lacaha haraadiga ah, oo ay ku jiraan wax kasta oo aanay bixin shirkadaha caymisku ama bixiyaasha dhinac saddexaad ee

khuseeya ama lagu daboolo kaalmada dhaqaale.

- UW Medicine waxay raaci doontaa, intii awoodeeda ugu badan ah, tilmaamaha gaarka ah ee bixiyaha marka ay masuuliyada saareyso bukaanka.

KHARASH KU DALICTAANKA CAYMISKA

UW Medicine waxay kharashka ku dalici doontaa shirkadaha gobalka, federaalka iyo shirkadaha caymiska ganacsiga ee kale. UW Medicine dusha kama saari doonto bukaanka mas'uuliyadaha lacag bixinta ilaa aan ka xallineyno dhammaan arrimaha la xiriira shirkadaha caymiska, oo ay ku jiraan rafcaanada diidmada. Mar kasta oo ay macquul tahay, UW Medicine waxay u doodi doontaa bukaanka si uu u helo lacagta caymiska kahor inta sheegashada magdhowga xirfadaha iyo xarunta loo badelin kuwo bukaan si shaqsi ah u bixin doono.

KHARASH KU DALICIDA BUKAANKA

UW Medicine waxay adeegsan doontaa nidaamyo macquul ah si caddaalad ah oo joogto ahna loo sameeyo si ay u soo uruuriso lacagta haraaga ah ee bukaanka si iskiis ah iskaga bixinaayo.

- Lacagaha waa in la bixiyo 30 maalmood gudahood oo laga bilaabaayo maalinta koobaad ee bayaanka lacagta la helo ilaa in is afgarad kale jiro maahee.
- Lacagaha haraadiga ah waa in la bixiyo 30 maalmood gudahood oo laga bilaabaayo maalinta koobaad ee bayaanka lacagta la helo.
- UW Medicine waxay diri doontaa bayaanada lacagta bukaanka laga rabo oo ku qoran khidmadaha xarunta iyo adeegga 30 kii maalmoodba mar muddo 120 maalmood ah.
- Bukaanada ka diiwaangashan MyChart waxay heli doonaa bayaan aan warqad ahayn ilaa inay dalbadaan maahee inay si toos ah warqad ahaan kugu helaan
- MyChart waxay bixisaa dookhto habboon oo muujinaaya Ogeysiisyada Lacagta dhabta ah ee Haraadiga iyo booqasho lacagta si ootamaatiga ah loogu bixin karo.
- Inta lagu jiro waqtigaan, bukaanadu waxay bixin karaan lacagta oo buuxda ama hadba mar ayay bixin karaan oo ay kujiraan:
  - Qorshaha Lacag bixinta
  - Kaalmada Dhaqaale
  - Khidmaha Dooda laga qabo
  - Bixinta macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan kharashka lagu dalacaayo bixiye kale ama caymiska kale
- Wicitaanada banaanka ayaa la sameeyaa si lacag bixin loo helo ama loo sameeyo qabanqaabo lacagta lagu bixinaayo.
- Bayaanka afaraad waa “Ogeysiinta kama dambeysta ah” oo ku wargelinaysa dammaanad qaadaha in akoonkiisa loo gudbin doono hay'ad aruurisa deymaha aan la bixin haddii lacag bixinta ama qabanqaabada lacag bixinta aan la sameyn 30 ka maalmood ee soo socda.
- Ku guuldareysiga inaad ka jawaabto ama aad dirto lacag bixinta oo dhan waxay keeni kartaa in hawshaada loo gudbiyo hay'ada deymaha la bixin waayo qaabilsan.
- Dhammaan bukaanada muujiya inay haystaan caqabado dhaqaale waa in lagu sameeyo qiimeyn ah inay heli karaan Kaalmo Dhaqaale iyo/ama caymiska Medicaid ee suurtagalka ah. Kaalmada dhaqaale waxa la bixin karaa waqti kasta, xataa ka dib marka hawsha loo gudbiyo hay'ada aruurisa deynta, laakiin waa in la codsadaa ka hor xukunka sharciga ah.

DOOKHYADA LACAG DHIMISTA

Qiimo dhimista ay bixiso UW Medicine ayaa la siiyaa bukaanada iyo dammaanad qaadayaasha aan caymis ku jirin ama helaya adeegyo aanu daboolin qorshahooda caymiska hadda. Lacag dhimisyada la siiyo marka bukaanku lacagta iska bixinaayo ayaa lagu dabaqaa nidaamka lacag bixinta ee lagu bixiyo khdimadaha xirfada iyo/ama xarunta. Haddii lacagta adeegyada loo bixiyo si buuxda ka hor inta aan adeegyada la bixin, markaas 10% qiimo dhimis ah ayaa la dalbadaa kadib qiimo dhimista 30% ah.

- Lacag bixinada buuxa ee aan caymiska lagu bixin (caymisku daboolin) kahor adeegyada intaan la bixin
  - 30% ah qiimo dhimis

    - 10% qiimo dhimis kadib qiimo dhimista 30% ah ayaa la sameeyaa
- Lacag bixinada buuxa ee aan caymiska lagu bixin (caymisku daboolin) kadib adeegyada intaan la bixin
    - 30% ah qiimo dhimis
- Lacag bixinada buuxa bukaanka caymiska kujira (caymisku daboolin) kahor adeegyada intaan la bixin
    - 30% ah qiimo dhimis
    - 10% qiimo dhimis kadib qiimo dhimista 30% ah ayaa la sameeyaa
    - Lacagta la jarto, qoondada caymiska, iyo/ama qayb bixinta lacagta caymiska qiimo dhimis lagu sameeyo
- Lacag bixinada buuxa bukaanka caymiska kujira (caymisku daboolin) kadib marka adeegyada aan caymisku daboolin la bixiyo
    - 30% ah qiimo dhimis
    - Lacagaha la jarto, qoondada caymiska, iyo/ama qayb bixinta lacagta caymiska qiimo dhimis lagu sameeyo

Haddii adeegyada la helay loo arko kuwo aan si sharci ah loogu daboolin qorshaha caymiska bukaanka / dammaanad qaadaha, qiimo dhimista caymiska la'aanta waxaa laga yaabaa in lagu dabaqo adeegyada aan la daboolin. Haddii bukaanku u qalmo Caawimaada Dhaqaale ee UW Medicine ama qiimo dhimista lagu helo xaaladaha adag, arrintaan waxay ka saari doontaa barnaamijka qiimo dhimista lacag iska bixinta lagu helo.

DOOKHYADA LACAG BIXINTA EE HABBOON

UW Medicine waxay aqbashaa lacagta caddaanka ah (lagu bixiyo xafiiska lacag qabtaha oo kaliya), jeegaga gaarka ah, jeega elektarooniga ah ama lacagta bixinada kaarka lacagta lagu bixiyo.
Kaararka lacagaha caddaanka ah iyo jeegaga ayaa la aqbalaa:

- Si buuxda oonleenka ugu bixinta kharashka ama helida qorshaha lacag bixinta aan lahayn ribada ayaa laga helaa MyChart 24/7.
- Laynka taleefoonka ootamaatiga ah waxaa la helaa 24/7— wac 206.520.0400.
    - Adeegga Macmiilka Isniin-Jimce 8:00 subaxnimo ilaa 5:00 galabnimo (marka laga reebo maalmaha fasaxa ah) si loo bixiyo ama loo sameysto qorshaha lacag bixinta— wac 206.520.0400.
    - Lacagta caddaanka ah ayaa laga aqbalaa UW Medical Center-xafiiska lacag qabtaha Montlake iyo Harborview oo kaliya.
    - Qaybaha bukaanka waa in la helo marka la helo bayaanka kharashka ka dib marka laga reebo in la sameeyo maahee nidaam qabanqaabo oo lacagta lagu bixinaayo, ama in codsi Kaalmada Dhaqaale la gudbiyo maahee.

QORSHOOYINKA LACAG BIXINADA AAN RABIDA LAHAYN

Qabanqaabada lacag bixinta UW Medicine waxaa lagu dhisaa codsiga bukaanka ee Akooonka Bukaanka iyo Adeegyada Taageerada ama khadka tooska ah ayadoo loo maraayo MyChart 24/7. Caadiyan, arrintaan waxay qaadan doontaa ilaa 12 bilood oo lacag bixino isku mid ah ama ilaa 24 billood haddii xaaladaha la oggolaaday ay khuseeyaan.

HAWLAHA LACAG ARUURINTA

Hawlaha Lacag aruurinta UW Medicine waxaa kujiri kara:

- Xisaabaadka waxaa loo diri doonaa uruurin kadib marka la sameeyo afar bayaan oo lacagta lagu dalbanaayo ayadoo aysan jirin nidaam qabanqaabo.
- Ogeysiiska koowaad ee ku wargelinaya dammaanad qaadayaasha inay haystaan 30 maalmood kadib marka ay helaan ogaysiiskaan si ay uga doodaan ansaxnimada deyntaan ama qayb ka mid ah, ama haddii kale xafiiskan wuxuu u qaadan doonaa deyntaan inay ansax tahay: soo gudbinta warbixinta u qalmida deyn maalinta 180aad.
- Wicitaanada taleefoonka.
- Xukuno sharci ah oo leh mushaarka joogto ah.
- Damaanadaha Caafimaadka.
- UW Medicine waa inay oggolaato tallaabo sharci oo kasta oo la qaadaayo kuna saabsan xisaabta.

TALAABADA LACAGTA URUURINTA EE AAN CAADIGA AHAYN (ECA)

Talaabada lacagta Uruurinta ee Aan Caadiga ahayn (Extraordinary Collections Actions, ECA) waa tallaabooyin u baahan nidaam sharci ama garsoor, ka lug leh iibinta deyn qolo kale, ama u gudbinta macluumaadka deyn la bixin waayay hay'ada deynta soo aruurisa ama xafiisyada." UW Medicine waxay xaq u leedahay inay qaado ECAs. ECA-yadaan waxaa kujira ECA-yadaan in dammaanad la dul dhigo hantida qofka iyo uruurinta mushaarka. ECA kasta oo ay qaado UW Medicine waxay noqon doontaa mid waafaqsan sharciyada gobolka iyo kan federaalka.

DAMAANADAHA CAAFIMAADKA

Marka bukaanku yahay dhibane shil galay ama fal kale oo khalad ah la kulmay, shirkadiisa caymiska caafimaadka guud ahaan ma bixin doonto kharashka adeegyada caafimaadka marka la go'aamiyo in dhinac kale uu ugu dambeyntii mas'uul ka noqon doono ficilka. Sidoo kale, waxaa laga yaabaa bukaanku inuusan lahayn caymis laakiin uu ka doonaayo nidaam xal dhinaca masuulka ka ah hawsha. Xaaladahan marka ay dhacaan, UW Medicine waxa laga yaabaa inay fayl gareyso damaanad ka dhan ah xallinta dhaawaca shakhsi ahaaneed ee mustaqbalka. Damaanadu waa nooc ka mid ah danta amniga oo la xariira hantida maguurtada ah ama tan shaqsi ahaaneed si loo xaqiijiyo bixinta deynta.

SI SIMAN ULA DHAQANKA DHAMMAAN BUKAANADA/DAMAANAD QAADAYAASHA

UW Medicine waxay u maamushaa xisaabaadka si waafaqsan siyaasada kharashaadka iyo uruurinada lacagta. Marnaba talaabada lagu sameeyo da'da, isirka, meesha qofka kasoo jeedo, qowmiyada, midabka, diinta, jinsiga, nooca galmada uu ka helo, aqoonsiga jinsiga, naafanimada, ama asalka qaran ee lagu dabaqayo xeerkan.

KHEYRAADKA

Nuqul ka mid ah siyaasadaan, iyo sidoo kale nuqulada Siyaasada Caawimaada Dhaqaale, Xog kooban oo ku saabsan Luuqada Cad ee Caawimada Dhaqaale, iyo Codsiga Caawimaada Dhaqaalaha ayaa la heli karaa iyadoo lala xiriirinayo mid ka mid ah goobaha Caawimaada Dhaqaale ee UW Medicine. Dhukumiintiyada ayaa sidoo kale laga heli karaa barta onlaynka ah ee uwmedicine.org/financialassistance.

Kharashaadka UW Medicine iyo websaytka Caymiska waxaa laga helaa kheyraadka bukaanka loogu talagalay uwmedicine.org/patient-resources/billing-and-insurance.